

Qoraalka Cilad-saarista Sanduuqa Dhijitalka u Bedela Analooga iyo Tilifeeshanka Dhijitalka ah

Xaqaa'iqa FCC ee Macmiilka

Geediga tilifeeshanka dhijitalka ahi (DTV) waxa weeyi doonista ah in dhamaan tilifeeshanada ful baawarka ah (full-power) ay joojiyaan inay ku baxaan habka analooga ah oo ay bilaabaan inay ku baxaan habka dhijitalka ah oo kaliya wixii ka dambeeya February 17, 2009. Xarumaha warbaahinta ee suuqyada maraykanku waxay imika ku tebiyaan wararka labadda hab ee analooga iyo dhijitalka. Haddii aad dhib kala kulanto helista barnaamijyada dhijitalka ah ee aagaaga, qoraalkan cilad-saarista ayaa ku siin doona liiska hubsashada xidhiidhsanaanta (connections) iyo tilmaamo ku aadan signalada dhijitalka.

Hubso xidhiidhsanaanta (Connections)

- Hubi in sanduuqa isku-bedelka dhijitalka iyo analooga (ama tilifeeshanka dhijitalka ahi) ay si fiican u xidhiidhsan yihiin. Hubso in anteenadu ay ku jirto godka-gelista (input) anteenada ee sanduuqaaga isku-bedelka dhijitalka iyo analooga (ama tilifeeshanka dhijitalka ah), siddoo kale hubso in godka-bixida (output) anteenada ee sanduuqa isku-bedelku ay ku xidhan tahay godka-gelida anteenada ee TV-gaaga analooga ah. Ku noqo buuga mulkiilaha ee qalabkaaga haddii aanad hubin in siddii saxda ahayd aanad u xidhiidhin.
- Hubso in qalabkaagu xidhiidhsan yahay isla markaana dabkoodu shidan yahay.
- Haddii aad haysato sanduuqa isku-bedela dhijitalka iyo analooga, TV-gaaga analooga ah gee janaal 3. Wuxuu arki doontaa meniyuuga fadhiisanta (set-up menu) ama sawir ka muuqda muraayada TV-gaaga. Haddii aad arki waydo meniyuuga fadhiisanta iyo sawir toona, TV-gaaga gee janaal 4. Haddii wali aanad arki karin meniyuuga fadhiisanta iyo sawirka midna, mar kale hubso xidhiidhsanaanta.

Samee Baadigoob Janaal (channel scan).

- Sanduuqyada isku-bedelka dhijitalka iyo analooga (iyo tilifeeshanada dhijitalka) waxay leeyihii badhan, inta badana ku yaal rimuudhka, kaas oo ay ku qoran tahay “fadhiisin (set-up)” ama “Meniyuu (menu)” ama ereyo la mid ah. Badhankaa tuuji si aad u gaadho qoraalka fadhiisinta (set-up menu). Adigoo isticmaalaya falaadhaha jiheeyayaasha ah ee rimuudhkaaga, dhexmar ikhtiyaarada (options) kuu ogolaanaya inaad samayso “baadigoob janaal.” Baadigoobka janaalku wuxuu raadin doonaa warbaahinta dhijitalka ah ee laga heli karo degaankaaga. Wuxuu akhridaa buuga mulkiilaha ee sanduuqa isku-bedelka dhijitalka iyo analooga (ama tilifeeshanka dhijitalka ah) faahfaahinta tilmaamaha sida aad u samaynayso baadigoob janaal ee qalabkaaga.
- Marka baadigoobka janaalku dhamaado, waxaa kuu suurtogali doonta inaad hesho mawjadaha janaalada dhijitalka ah ee ay soo qabatay anteenadaadu. **Si muddo-dhaaf ah ayaad u samayn doontaa baadigoob janaal si aad u hubsato bal in janaalo cusub oo dhijital ahi soo kordheen.**

Isudheelitior Anteenadaada (Adjust your antenna)

- Adhjas-garaynta yar ee lagu samaynayo anteenadaada waxay isbedel wayn ku keeni kartaa tirada janaalada dhijitalka ah ee aad heli karto. Haddii aad haysato anteenoo gudaha ah, isku day inaad kor u qaadu anteenada adigoo ku dhawaynaya gidaarka dibada ee gurigaaga. Kadib adhjas garaynta anteenada, waxaad samaysaa baadigoob janaal si aad u eegto in soo-qabashada anteenadu fiicnaatay.
- Marka aad adhjas garaynayo anteenada, waxaa laga yaabaa inaad kaashato “saacada xooga signalka” ee sanduuqaaga isku-bedelka dhijitalka iyo analooga (ama tilifeeshanka dhijitalka) si aad go’aan uga gaadho in adhjas garayntaadu ay hagaajinayso xooga signalka. Saacada xooga signalka waxaa inta badan laga heli karaa astaamaha meniyuuga ee rimuudhka. Ka fiiri buuga mulkiilaha ee qalabkaaga



tilmaamta faahfaahsan ee sida loo helayo saacada xooga signalka. Xusuusnow inaad samayso baadigoob janaal kadib marka aad adhjas garayso anteenada.

- Xarumaha tilifeeshanada ee ku baxaya dhijitalka waxay isticmaalaan mawajda VHF (janaal 2-13) iyo mawajda UHF (janaal 14-51). Anteenooyinka gudaha oo badan ayaa u isticmaala "raabit eeris (rabbit ears)" mawjadaha VHF iyo anteeno "soo laaban (loop)" ama "qaanso" ah oo ay u isticmaalaan mawjadaha UHF. Hubso inaad isticmaalayso anteeno isku-darsatay mawjadaha VHF iyo UHF oo si fiican u xidhiidhsan.

Haddii Wali aad Dhib la Kulmayso:

- Ilaa la gaadhayo February 17, 2009, qaar ka mid ah idaacadaha ayaa ku soo hawgalaya awood heerkeedu hooseeyo. Haddii aanad helayn qaar ka mid ah idaacadaha dhijitalka ah, tan macnaheedu maaha in ciladi ku jirto anteenada ama sanduuqa isku-bedelka dhijitalka iyo analooga (ama tilifeeshanka dhijitalka ah). Ka hubso xarunta TV-ga inay qorshaynayaan hawlo lagu hagaajinayo soo-qabashada.
- Marka singnalka TV analoog ahi uu dacif yahay ama uu soo qabanayso wax-kale (interference), taagnaan, cadaan iyo kharibnaan ayaa ka muuqnaya muraayadda. Tebinta dhijitalka ah ayaa bixin doonta sawir waadix; si kastaba ha ahaatee, haddii singnalka xoogisu hoos maro xoog yar oo mucayim ah, sawirka waa la waayi karaa. "Saamayntan cidhifowga (cliff effect)" ah macnaheedu waxaa weeyi in haddii aad daawato xarumaha TV-ga analooga ah ee taagan ama khariban, in laga yaabo in aad adhjas garayso ama aad kor u qaado sistamkaaga anteenada.
- Anteenooyinka gudaha ee fudud waxay u shaqanayaan si yar oo laga yaabo ina aanay ku haboonayn degaankaaga. Haddii soo-du'wida anteenada gudaha ee imika aanad ku qancin, waxaa laga yaabaa inaad soo qaadato anteenada gudaha oo leh astaamaha soo qabashada signalada UHF ama/yo cod baahiye si aad kobciso singnalka la soo du'way (inta badan noocan waxaa la yidhaa anteenada gudaha ee firfircoo).
- Guud ahaan, anteenada dibada soo-du'wideedu way ka fiicnaanaysaa tan anteenada gudaha. Si kastaba ha ahaatee, shaqada anteenada dibadu muddo kadib hoos ayay u dhacaysaa cimilada awgeed. Haddii ay dhib ku haysto, waxaad iska hubisaa waayiro dabcay ama daxlay, meelo anteenada ah oo jajabay iyo in anteenadu jihadii saxda ahayd u jeedo.
- Isku day in dhererka anteenada ee u dhexeeya anteenadaada iyo sanduuqa isku-bedelka dhijitalka iyo analoogu (ama tilifeeshanka dhijitalku) uu aad u gaaban yahay taas oo samaynaysa soo-qabashada ugu fiican.
- "Firdhiyayaasha (splitter)" loo adeegsado in anteeno kaliya lagu xidho dhowr sanduuqyada isku-bedela dhijitalka iyo analooga (ama tilifeeshano dhijital ah) waxay yareeyaan xadiga signalka uu qalab kastaa heli karo. Haddii ay dhib kaa haysato, fiiri bal in firdhiye la'aantu ay hagaajinayo soo-qabashada. Xaaladaha qaarkood firdhiye "firfircoo" oo wata cod baahiye ayaa xalin kara mushkilada.
- Haddii aad u dhowdahay idaacad taawarkeed, soo qabashada idaacadaasi, iyo idaacadaha kaleba, waxaa hoos u dhigaya signalka "xad-dhaafka ah". Ka fikir inaad isticmaasho "atinuyuutar (attenuator)" ama inaad cod baahiyaha ka saarto si aad u hagaajiso soo-qabashada.
- Haddii aad go'aansato inaad bedesho ama kor u qaado anteenadaada gudaha ama dibada, noocyoo kala duwan ayaa laga helayaa tukaanada elektarooniga kuwaas oo jooga qiimo kale duwan. Bogaga internet-ka sida www.antennaweb.org ayaa laga heli karaa macluumaad ku sahabsan goobaha taawarada idaacadaha iyo noocyada anteenooyinka gudaha iyo dibada ee ku haboon idaacadaha aad soo du'wan rabto. Haddii taageero xaga kor u qaadista anteenooyinka ah aad doonayso, la xidhiidh tukaan anteeno ama dadka anteenada rakiba ee degaankaaga.

Wixii tafaasiil dheeraad ah ee ku aadan geediga DTV-ga, booqo www.dtv.gov ama la xidhiidh FCC adigoo iimayl ugu hagaajinaya ciwaanka dtvinfo@fcc.gov; tilifoонка 1-888-CALL-FCC (1-888-225-5322) codka ama 1-888-TELL-FCC (1-888-835-5322) TTY; faakiska 1-866-418-0232; ama ciwaankan boosta ah ugu dir waraaq:



Federal Communications Commission
Consumer & Governmental Affairs Bureau
Consumer Inquiries and Complaints Division
445 12th Street, SW
Washington, DC 20554

####

Si aad u hesho kan ama qoraal kasta oo dadwayne oo u dhigan hab la heli karo (elektaroonig, qoraalka ASCII, farta indhoolaha, far waawayn, ama dhegaysi) fadlan waraaq soo qoro ama naga soo wac tilfoonka ama ciwaanka hoos ku xusan, amase iimayl u dir FCC504@fcc.gov.

Dhokumentigan waxaa loogu talogalay kaliyo kordhinta aqoonta dadwaynaha ee looguma talogalin in lagu saameeyo dacwad kasta ama kiis ku lug leh arrinta halkan ku qoran ama qaddiyad kasta oo kale oo la xidhiidha.

9/23/08

